

Kanton Schaffhausen
Kantonsärztlicher Dienst
Mühlentalstrasse 105
CH-8200 Schaffhausen
www.sh.ch



Adeegga Caafimaadka ee Gobaljaka

Ku socota ardayda dhigata dugsiyada
hoose waalidiintoda

Schaffhausen, 7. Juun 2021

Baadhitaanka soo noqnoqda ee dugsiyada hoose

Waalidiinta qaaliga ah

Waxa si guul ah loo soo Bandhigay dugsiyada sare ee 1.aad iyo 2.aad tijaaboyin soo noqnoqod ah oo loo isticmaalayo shaybaarrada candhuufta.

Tijaaboyinkan ayaa hadda labadii toddobaad ee la soo dhaafay loo isticmaalay dugsiyada hoose iyo xannaanada (Dörflingen) oo qayb ka ah mashruuc tijaabo.

Nidaamkan waxaa lagu hubin karaa oo lagu buuxin karaa baahida fasallada hoose iyo dhexe. Mashruuca tijaabadani wuxuu muujiyey in loo samayn karo carruurta yar yar ee iskuulka dhigata iyo in dadaalka loogu jiro dugsiyada la maareeyo.

Golaha Dowlada hoose ayaa ka hadshay khibrada wangaasan iyo sida ay u suura gashay arintaas. Iyadoo ay tirada kiisasku hoos u sii dhacayaan. Oo uu faafitaankuna istaagay. Taas oo larabo inay dugsiyada hoose isku diyaariyaan maamul ahaan iyo abaabul ahaanba hirgalinta tijaabooyinka soo noqnoqda. Taas kadibna Gobolku wuxuu furasad u helayaa iyadoo aad loo gu mahdinayo diyaarinta maamulka iyo abaabulka inuu si dhakhso leh ugu isticmaalo dhammaan iskuulada hoose haddii ay dhacdo xaalad guud oo ka sii daraysa.

Tijaabooyinkan , ardaydu waxay Isbuuciiba hal mar dhiibayaan candhuufta (majirto in sanko qori la iska galinayo) fasalka ama klaaska dhexdiisa.

Qofka mas'uulka ka ah goobta candhuufta ayuu Baarayaa (10 qaybood baa loo Shaybaadhayaa Candhuufta).

Haddii natiijada baadhitaankaas ay tahay mid bostiif ah, baaritaanno dheeri ah waa in la sameeyaa ka dib si loo ogaado dadka wax qaba.

Ujeedadaas awgeed, ardayda noqota bositifka waxaa laga codsanayaa inay maraan baadhitaanka shaqsiyeed PCR(waxa la iskaga qaadayaa Dhaqtarka wayn). Carruurta

da'doodu ka yar tahay 12 sano, baaritaankaan waxaa had iyo jeer laga qaadi doonaa Candhuufta, taas oo carruurta aan loo oggolayn inay wax cabbaan ama wax cunaan ugu yaraan saacad ka hor. Carruurta da'doodu tahay 12 sano iyo wixii ka weyn ayaa go'aan ka gaari kara haddii ay doonayaan in laga baaro Candhuufta ama Qoriga sanko laga galiyo. Falanqaynta sheybaarka dambe waxaa lagu sameeyaa labada xaaladood iyadoo la adeegsanayo habka PCR.

Casharradu way sii socon doonaan Fasalka dhexdiisa xataa haddii Baritaanku bositif yahay. Kalaaska waxa laga karantinimeenayaa kalasyada kale. Ardayda dhigata kalaasyada ka sareeya 4-aad waa inay xidhnadaan maskada ilaa laga helayo natiijada baritaanka.

Isla marka hawshu dhammaato, inta badan waxay qaadata 48 saacadood, casharda sidoodii bay ku noqonayaan.

Ardayda kaqeyb qaadata badhitaanka soo noqnoqda ama PCR oo sidaa darteed la soo bandhigi kariin natiijo bositif ama nagatif ah, waxay galayaan karantiil. Karantiilkan waxaa laga qaadi karaa markay natiijada la xaqiijiyo qaybta PCR oo ay noqto nagatif, taas oo waalidiinta laftooda ay tahay inay ku dadaalaan arinta badhitaanka.

Websaydka www.sh.ch/corona hoosta cinwaanka "Wax walba oo ku saabsan imtixaanka" [«Alles rund ums Testen»](#) waxaad ka heli doontaa macluumaad dheeraad ah iyo dukumiintyo ku saabsan badhitanka iyo natiijada soo noqnoqda. Ardayda ayaa si faahfaahsan loogu wargalinayaa nidaamkan fasalka dhexdiisa. Intaas waxaa sii dheer, maamulka iskuulku wuxuu ka jawabi su'aalaha iyo waxa kasta oo arintaan ku saabsan.



Waan ku farxi lahayn haddii aad na siiso ogolaanshahaaga in cunugaagu uu kaqeybqaato hirgalinta ugu dambeynta badhitankan soo noqnoqda sidaasna aad ku muujiso midnimadaada ardayda iyo macalimiinta. Fadlan buuxi foomka ku lifaaqan si ilmahaagu dugsiga Jimcaha, Juun 11, 2021 uukeeno.

Waad ku mahadsan tahay taageeradaada!

Waad salaamantihin

Dr. med. Elke Lenz-Agnes
Ku-xigeenka Dhakhtarka Gobolka